



JAMHUIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
GOLAHA AQALKA SARE

# Warbixinta Kalfadhiga 5<sup>aad</sup> ee Golaha Aqalka Sare

(06<sup>th</sup> Luulyo, 2024 – 01<sup>st</sup> Diseembar, 2024)





## Tusmo

---

➤ Arar	1
➤ Oraahda Guddoomiyaha Aqalka Sare	2
➤ Kulamada Guud ee Golaha Aqalka Sare:	4
➤ Ajendayaasha Kulamada Guud ee Golaha Aqalka Sare	4 - 11
➤ Ajendayaasha Kulamada Wadajirka ah ee Labada Gole ee BJFS	12 - 15
➤ Masuuliyiinta Hortimid Aqalka Sare:	16
➤ Hindise-sharchiyeedyada uu Goluhu Ansixiyay:	17
➤ Hindise-sharchiyeedyada Horyaalla Golaha Aqalka Sare	17
➤ Warbixinna la hor keenay Golaha	18
➤ Go'aannada iyo Qaraarrada Golaha:	19
a) Go'aano Gole;	19
b) Qaraarro Golaha;	19
c) Go'aano Maamul;	19
➤ Warbixinna Guddiyada Aqalka Sare	20-22
➤ Warbixinna Guddiyada ku meel gaadhka ah	23
➤ Metelaada Aqalka Sare ee Bulshada Soomaaliyeed	24
➤ xiriirkha arrimaha dibadda ee Aqalka sare	24
➤ Safarro iyo Wufuud	25
➤ Wufuudda soo booqatay Golaha	26
➤ Metelaadda Aqalka Sare ee Dowlada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka	27
➤ Warbixinta Xafiiska Habdhowraha Golaha Aqalka Sare	28
➤ Waxqabadka Maamulka Aqalka Sare	29-30
➤ Oraahda Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare	31



**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**  
*Guddoomiye kuxigeenka kowaad  
Aqalka Sare BJFS*



**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**  
*Guddoomiyaha Aqalka Sare BJFS*



**Sen. Abdulaahi Cali Timacade**  
*Guddoomiye kuxigeenka Labaad  
Aqalka Sare BJFS*



**Sen. Samsam Ibrahim Cali**  
*Habdhowraha Aqalka Sare*



**Sen. Fartuun Abdulqaadir Faarax**  
*Habdhowraha ku xigeenka Aqalka Sare*



## ARAR

Intii lagu gudajiray kalfadhigii 5aad ee Baarlamaankii 11aad Golaha Aqalka Sare wuxuu yeeshay 35 kulan, 24 ka mid ah kulamadan waxaa si gaar ah u yeeshay Aqalka Sare, halka 11 kalana ay si wadajir ah u yeeshen labada Gole.

Warbixintaani waxay koobeysaa dhammaan hawla Golaha Aqalka Sare u qabsoomay intii lagu guda jiray kalfadhiga 5aad oo ay ku jiraan Kulamada Golaha, Warbixinnda la hor keenay Golaha, masuuliyiinta horyimid Golaha Guud iyo Guddiyada, Go'aannada iyo Qaraarada Golaha, Go'aannada Maamul, Waxqabadka Guddiyada Golaha, abaalmarinnada uu Goluhu bixiyay, Safarrada shaqo ee Golaha iyo wufuudda soo booqatay Aqalka Sare.



**”**

## ORAAHDA GUDDOOMIYAH AQALKA SARE

Mahad oo idil waxay u sugnaatay Allaah Subxaanahu wa tacaalaa ee na uumay, caqli aan xumaanta iyo wanaagga ku kala garanno na siiyay, nagana dhigay Islaam.Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa uu ka kooban yahay labo aqal (Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka) sida uu xeerinayo Qod.55aad (1) ee Dastuurka KMG ah. Labadaas aqal waxaa ay si siman u wadaagaan howlaha xeer-dejinta Dalka iyo korjoogtaynta xukuumadda Federaalka Soomaaliya sida ku cad cutubka 6aad ee Dastuurka KMG ah. Aqalka Sare wuxuu la gaar yahay metelaadda danaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo ilaalinta nidaamka federaalka; si waafaqsan Qod.61aad (3) iyo meeriska hore Qod.71aad ee Dastuurka KMG ah. Intii lagu gudajiray kalfadhigii 5aad ee Baarlamaankii 11aad Golaha Aqalka Sare wuxuu yeeshay 35 kulan, 24 ka mid ah kulamadan waxaa si gaar ah u yeeshay Aqalka Sare, halka 11 kalana ay si wadajir ah u yeesheen labada Gole.

Goluhu wuxuu xoojin doonaa kaalintiisa ku aaddan xallinta khilaafadka ka dhix dhasha hay'adaha dastuuriga ah ee Dawlada Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Dawlada Federaalka. Golaha Aqalka Sare waxaa ka go'an in uu joogteeyo xiriirkha wanaagsan ee uu la leeyahay Hay'adaha labada heer dawladeed, ururada rayidka ah iyo hay'adaha caalamiga ah.

Haddaba, Warbixintaani waxay koobeysaa dhammaan hawlaha Aqalka Sare u qabsoomay intii lagu guda jiray kalfadhiga 5aad oo ay ku jiraan Kulamada Golaha, Warbixinnda la hor keenay Golaha, masuuliyiinta horyimid Golaha Guud iyo Guddiyada, Go'aannada iyo Qaraarada Golaha, Go'aannada Maamul, Waxqabadka Guddiyada Golaha, abaalmarinnada uu Goluhu bixiyay, Safarrada shaqo ee Golaha iyo wufuudda soo booqatay Aqalka Sare.

Ugu dambeyntii, Guddiga Joogtada ah ee Golaha, Guddiyadda Gola ha iyo Xafiiska Maamul ee Golaha waxay muujiyeen dadaal dheeraad ah oo wax ku ool ah iyaga oo u gutey waajibaadkooda si hufan oo ay ku dheehantahay hawl-karnimo iyo xil gudasho hagar la'aaneed. Wuxaan u rajaynaya Golaha iyo Hawlwadeennadiisa kalfadhiyo kale oo khayr iyo baraare leh.



*Guddoomiyah Aqalka Sare BJFS*

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**



## KULAMADA GUUD EE GOLAHA AQALKA SARE:

Kulamada	Kalfadhiga 4aad
Kulamada guud ee Golaha Aqalka Sare	24 Kulan
Kulamada wadajirka ah ee labada Gole ee BJFS	11 Kulan
<b>Wadarta kulamada kalfadhiga</b>	35 Kulan
Warbixinna gaarka ah ee la hor geeyay Aqalka Sare	4 Warbixin
Ajendayaasha kulamada guud ah ee Golaha Guud	34 Ajende
Ajendayaasha kulamada wadajirka ah ee Labada Gole ee BJFS	21 Ajende
<b>Wadarta ajendayaasha kalfadhiga</b>	55 Ajende
Masuuliyiinta horyimid Aqalka Sare	11 Masuul
Hindise-sharciyeedyada uu ansixiyay Aqalka Sare	13 Sharci
Hindise-sharciyeedyada horyaala Golaha	2 Hindise-sharci

## AJENDAYAASHA KULAMADA GUUD EE GOLAHA AQALKA SARE:

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo yeeshay 24 kulan muddadii uu socday kalfadhigii 5aad ajendayaasha la horgeeyey waxay gaarayeen 34 ajende;

Halkan hoose waxaa si dhameystiran ugu faahfaahsan kulamada uu yeeshay Golaha Aqalka Sare kalfadhigii 5aad , waxayna kala yihiin sida soo socota:





## KULANKA 1aad

13 July, 2024,

Golaha Aqalka Sare wuxuu yeeshay kulankii ugu horeeyay ee kalfadhiga 5aad, iyada oo Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Maaliyadda XFS, Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xaange, dulmar guud ugu sameeyay Sanatarrada Aqalka Sare muhiimadda sharciga Hay'adda Xisaabiyeysaasha Soomaaliyeed iyo sida dhismaha hay'addaasi ay dalka muhiim ugu tahay.

Kulankani wuxuu lahaa hal ajende oo ah:

1. Akhrinta 1aad ee Hindise sharchiyeedka Hay'adda Xisaabiyeysaasha Soomaaliyeed.





## KULANKA 2aad

**20 JULLY, 2024**, Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha iyo Dib u heshiisiinta Aqalka Sare Sanatar Deeqa Xasan Xuseen, ayaa Golaha la wadaagtay warbixin ku saabsan arrimaha dib-u-heshiisiinta dalka iyo sida loo heli karo dib u heshiisiin dhaqan gal ah oo lagu kalsoon yahay.

Kulankani wuxuu lahaa hal ajende oo ah:

1. Warbixin iyo ka-doodista arrimaha dib-u-heshiisiinta Dalka.



## KULANKA 3aad

**27 JULLY, 2024**, Aqalka Sare wuxuu fadhi Guud ku dhegaystay Warbixin uu soo gudbiyay Guddiga Maaliyadda taas oo ku sabasaneyd Hindishe-sharchiyeedka Hay'adda Xisaabiyeysaasha Soomaaliyeed, iyada oo Senatoradu ka doodeen Warbixinta Guddigu horkeenay Golaha ee Hindise-sharchiyeedka kor ku xusan.

Kulankani wuxuu lahaa hal ajende:

1. Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Hay'adda Xisaabiyeysaasha Soomaaliyeed.





## KULANKA 4aad

**29 July, 2024,** waxaa Aqalka Sare ka dhacay kulankii 5aad ee Golaha intii lagu gudajiray kafadhiga 5aad, kulankan wuxuu ku saabsanaa dhagaysiga warbixin iyo waydiimo furan oo ku aadan qaar kamid ah hay'addaha hoos yimaada Wasaaradda Arrimaha Gudaha, kuwaas oo kala ah: Hay'adda maareynta Musiibooyinka, Hay'adda Diwaangalinta iyo Aqoonsiga Dadwayaha & hay'adda Qaxootiga Qaranka.

Ajendaha kulanka wuxuu ahoo;

1. Dhagaysiga war-bixinta iyo waydiimo furan oo ku saabsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS, iyo Hay'adaha hoos yimaada.



## KULANKA 5aad

**31 July, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa ajendeyaasha hoos ku qoran oo kala ah:

1. Akhrinta 3aad ee Hindise-Sharchiyeedka Hay'adda Xisaabiyeeyaaasha Soomaaliyeed.
2. Qaybinta nuqulka wax-ka-beddelka Xeer-Hoosaadka Golaha.





## **KULANKA <sup>6aad</sup>**

**7 August, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

- 1.Ka-doodista wax-ka-beddelka Xeer-Hoosaadka Golaha (Cutubka 1aad ilaa Cutubka 3aad).

## **KULANKA <sup>7aad</sup>**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo ahaa:

- 1.Ansixinta Xubin ka mid noqonaysa Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka.
- 2.Sii wadista ka doodista wax-ka-beddelka Xeer-Hoosaadka Golaha (Cutubka 4aad ilaa Cutubka 7aad).

## **KULANKA <sup>8aad</sup>**

**17 August, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Ka doodista lacagta shilin Soomaaliga ah.



## KULANKA 9<sup>aad</sup>

**21 August, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 1aad ee Hindise sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliya.
2. Soo jeedin la xiriira Arrimaha Shaqada Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah iyo Aqalka Sare BJFS.

wuu Baaqday

## KULANKA 10<sup>aad</sup>

**24 August, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 1aad ee Hindise sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliya.
2. Soo jeedin la xiriira Arrimaha Shaqada Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah iyo Aqalka Sare BJFS.

## KULANKA 11<sup>aad</sup>

**28 August, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Ka-doodista wax-ka-beddelka Xeer-Hoosaadka Golaha (Cutubka 8aad ilaa Cutubka 11aad).

## KULANKA 12<sup>aad</sup>

**02 September, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 1aad ee Hindise sharchiyeedka Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Qaranka Soomaaliyed.



## KULANKA 13<sup>aad</sup>

**12 October, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Dhageysiga warbixinta Guddiga Xeer-hoosaadka ee wax-ka-beddelka Xeer-hoosaadka Golaha.

## KULANKA 14<sup>aad</sup>

**23 October, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa saddex ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 1aad ee Hindise shariyeedka Hay'adda Shariyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed.
2. Akhrinta 1aad ee Hindise shariyeedka Xakamaynta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed.
3. Akhrinta 2aad ee Hindise shariyeedka Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Qaranka Soomaaliyeed.

## KULANKA 15<sup>aad</sup>

**28 October, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 1aad ee Hindise shariyeedka Badbaadada Dhir-beereedka iyo Takoorka.
2. Akhrinta 1aad ee Hindise shariyeedka Abuurka iyo Noocyada Dhir-beereedka Soomaaliyeed.





## KULANKA 16<sup>aad</sup>

**28 October, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 3aad ee Hindise sharchiyeedka Sharciga Ilalinta Xuquuqda Naafada

## KULANKA 17<sup>aad</sup>

**18 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa saddex ajende

oo ahaa:

1. Akhrinta 1aad ee Hindise sharchiyeedka Tacliinta Sare.
2. Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Hay'adda Shariyeenta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed.
3. Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Xakamaynta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed.



## KULANKA 18<sup>aad</sup>

**19 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa saddex ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 3aad ee Hindise sharchiyeedka Hay'adda Shariyeenta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed.
2. Akhrinta 3aad ee Hindise sharchiyeedka Xakamaynta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed.
3. Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliyeed.

## KULANKA 19<sup>aad</sup>

**25 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo ahaa:

1. Sii-wadida Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliyeed.
2. Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Tacliinta Sare.



## KULANKA 20<sup>aad</sup>

**25 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 3aad ee Hindise sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliyeed.

## KULANKA 21<sup>aad</sup>

**26 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa saddex ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 3aad ee Hindise sharchiyeedka Tacliinta Sare.
2. Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Badbaadada Dhir-beereedka iyo Takoorka.
3. Akhrinta 2aad ee Hindise sharchiyeedka Abuurka iyo Noocyada Dhir-beereedka Soomaaliyeed.

## KULANKA 21<sup>aad</sup>

**26 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 3aad ee Hindise sharchiyeedka Badbaadada Dhir-beereedka iyo Takoorka.
2. Akhrinta 3aad ee Hindise sharchiyeedka Abuurka iyo Noocyada





## AJENDAYAASHA KULAMADA WADAJIRKA AH EE LABADA GOLE EE BJFS;

Intii uu socday Kalfadhigii 5aad Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya labadiisa gole wuxuu yeeshay 11 kulan oo wadajir ah, waxaana ajendayaasha kulamadaas ay kala ahaayeen;

### KULANKA 1aad

**6 July 2024**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

- 1.Furitaanka Kalfadhiga 5aad ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

### KULANKA 2aad

**09 October, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo kala ahaa:

1. Akhrinta 1aad warbixinta Xisaab Xirka Sanad Miisaaniyadeedka 2023,
- 2.Akhrinta 1aad Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda 2025.

### KULANKA 3aad

**21 October, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajenda oo ahaa:

1. Akhrinta 2aad warbixinta Xisaab Xirka Sanad Miisaaniyadeedka 2023.





## KULANKA 4<sup>aad</sup>

**26 October, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo kala ah:

1. Akhrinta 3aad iyo u codeynta warbixinta Xisaab Xirka Sanad Miisaaniyadeedka 2023,
2. Warbixinta akhrinta 2aad Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda 2025.

## KULANKA 5<sup>aad</sup>

**04 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Akhrinta 3aad iyo u codeynta Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda 2025



## KULANKA 6<sup>aad</sup>

**11 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa afar ajende oo kala ah:

1. Ansixinta habraaca fadhiyada wadajirka ah ee saddexda hindise sharchiyeed,
2. Akhrinta 1aad ee Hindisaha Xeerka Doorashooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,
3. Akhrinta 1aad ee Hindisaha Xeerka Ururadda iyo Xisbiyada Siyaasadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,
4. Akhrinta 1aad ee Hindisaha Xeerka Dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Soohdimaha.



## KULANKA 7aad

**13 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa saddex ajende oo kala ah:

1. Dhaarin Senator Aqalka Sare,
2. Dhaarin Wasiiro magacaaban,
3. Akhrinta 2aad ee Hindisaha Xeerka Dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Soohdimaha.

## KULANKA 8aad

**16 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo kala ah:

1. Akhrinta 3aad iyo u codeynta Hindisaha Xeerka Dhismaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha,
2. Warbixinta akhrinta 2aad ee Hindisaha Xeerka Ururadda iyo Xisbiyada Siyaasadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## KULANKA 9aad

**20 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo kala ah:

1. Akhrinta 3aad iyo u codeynta Hindisaha Xeerka Ururadda iyo Xisbiyada Siyaasadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,
2. Warbixinta akhrinta 2aad ee Hindisaha Xeerka Doorashooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.





## KULANKA 10aad

**23 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa laba ajende oo kala ah:

1. Dhaarin Xildhibaan,
2. Akhrinta 3aad iyo u codeynta Hindisaha Xeerka Doorashooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## KULANKA 11aad

**27 November, 2024,**

Kulankan wuxuu lahaa hal ajende oo ahaa:

1. Ansixinta Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.





## MASUULIYIINTA HORTIMID AQALKA SARE:

Golaha Aqalka Sare waxaa horyimid Masuuliyiinta hoos ku qoran;

Lr.	Magaca	Jagada	Tariikh
1	<b>Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xaange</b>	Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Maaliyadda XFS,	13kii Jully, 2024
2	<b>Mudane Jodeph Ntakirutimana</b>	Guddoomiyaha Baarlamaanka Ururka Bulshada Bariga Afrika	23kii Jully, 2024
3	<b>Mudane Saleebaan Sheekh Cumar</b>	Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda	27kii Jully, 2024
4	<b>mudane Cali Yuusuf Cali (Cali Xoosh), Maxamuud Macalin Abdiwali Timacadde Safiyo Maxamed.</b>	Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS Guddoomiyaha hay'adda SODMA Maareeyaha Hey'adda NIIRA Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha	29kii Jully, 2024
5	<b>Mudane Maxamed Cilmi Ibraahim</b>	Wasiirka Wasaaradda shaqada iyo arrimaha Bulshada XFS	24kii August, 2024
6	<b>Bashiir Maxamed Jaamac</b>	Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqul insaanka XFS	2dii September, 2024
7	<b>Asad Cabdirisaaq Maxamed,</b>	Wasiir Dowlaha Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka XFS	23kii October, 2024
8	<b>Xanaan Cabdicasiis Barre,</b>	Wasir ku xigeenka Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqul Insaanka XFS	28kii October, 2024
9	<b>Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye)</b>	Wasiirka Beeraha iyo Waraabka XFS	28kii October, 2024
10	<b>Mudane Faarax Sheekh Cabdulqadir</b>	Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare	18kii November, 2024
11	<b>Mudane Xil, Yuusuf Maxamed Aadan</b>	Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada XFS,	19kii November, 2024



Wasiirka Beeraha & Waraabka  
Maxamed Cabdi Xayir Maareeye



Wasiirka Waxbarashada,  
Hiddaha iyo Tacliinta Sare  
Mudane Faarax Sheekh Cabduqaadir



Wasiirka Shaqada iyo  
Arrimaha Bulshada  
Mudane Yuusuf Maxamed Aadan

*“qaar ka mid ah xubnaha golaha wasiirada ee XFS oo horyimid fadhliga guud ee golaha aqalka sare”*



## HINDISE-SHARCIYEEDYADA UU GOLUHU ANSIXIYAY:

Intii lagu gudajiray kalfadhigii 5aad, Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ansixiyay Hindise-sharchiyeedyada kala ah:

No	Hindise-sharchiyeedka	Tr. la ansixiyay
1	Hindise-sharchiyeedka Hay'adda Xisaabiyeysaasha Soomaaliyed	31 Jully, 2024
2	Hindise-sharchiyeedka Sharciga Ilalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyed	28 October 2024
3	Hindise-sharchiyeedka Hay'adda Sharciyeenta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaaliyed	19 November 2024
4	Hindise-sharchiyeedka Xakameynata Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyed	19 November 2024
5	Hindise-sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliyed	25 November 2024
6	Hindise-sharchiyeedka Tacliinta Sare	26 November 2024
7	Hindise-sharchiyeedka Badbaadada Dhir-beereedka iyo Takoorka	26 November 2024
8	Hindise-sharchiyeedka Abuurka iyo Noocyada Dhirta Soomaaliyed	26 November 2024
9	Xeerka Dhisidda Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka iyo Soohdimaha	21 November 2024
10	Xeerka Dhisidda Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda JFS	21 November 2024
11	Xeerka Doorashooyinka Qaranka	23 November 2024
12	Xeeka Xisaab xirka Miisaaniyadda sanad maaliyadeedka 2023	10 decmber 2024.
13	Xeerka Qoondada Miisanaiyadda 2025	10 December 2024

## HINDISE-SHARCIYEEDYADA HORYAALLA GOLAH AQALKA SARE:

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaliya waxaa horyaalla laba Hindise sharchiyeed oo kala ah;

1. Hindise sharchiyeedka Kaalmo Sharciyeedka Federaalka
2. Hindise sharchiyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyed



## WARBIXINNADA LA HOR KEENAY GOLAHAD:

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa la hor keenay isla markaana uu ka dooday 28 warbixinood oo kala ah:-

**1. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Hay'adda Xisaabiyeysaasha Soomaaliyeed oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**2. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**3. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**4. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Xakameyntra Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**5. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliyeed oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**6. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Tacliinta Sare oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**7. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Badbaadada Dhir-beereedka iyo Takoorka oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**8. Warbixinnada Hindise**

Sharchiyeedka Abuurka iyo Noocyada Dhirta Soomaaliyeed oo ka koobnaa 3 warbixinood.

**9. Warbixin ku saabsan arrimaha dib-u-heshiisiinta Dalka.**

**10. Warbixin ku saabsan lacagta shilin Soomaaliga ah.**

**11. Warbixin la xiriira Arrimaha Shaqada Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah iyo Aqalka Sare BJFS.**

**12. Warbixinta Guddiga**

Xeer-hoosaadka ee wax-ka-beddelka Xeer-hoosaadka Golaha.





## GO'AANO GOLE

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu gaaray Go'aannada iyo Qaraarrada hoos ku faahfaahsan;

### A) GO'AANO GOLE:

Golaha Aqalka Sare wuxuu 17kii Agosto, 2024 go'aan ku gaaray Ansixinta Xubin Aqalka Sare uga qaybgalaysa Guddiga La-socodka Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

### B) QARAARRO GOLE:

Golaha Aqalka Sare wuxuu gaaray qaraarrada soo socda:

Qaraarro Golle	Tariikh
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Hay'adda Xisaabiyeeyashaa Soomaaliyeed	31 July, 2024
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed	28 October 2024
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Hay'adda Sharchiyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed	19 November 2024
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Xakameynta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed	19 November 2024
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Xeerka Shaqada Soomaaliyeed	25 November 2024
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Tacliinta Sare	26 November 2024
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Badbaadada Dhir-beereedka iyo Takoorka	26 November 2024
Ansixinta Hindise-sharchiyeedka Abuurka iyo Noocyada Dhirta Soomaaliyeed	26 November 2024

### C) GO'AANNO MAAMUL:

Maamul	Tariikh
Magacaabista Guddiga saaxiibtinimada Soomaaliya Luxembourg.	24 July, 2024
Magacaabista Guddiga ka talabixinta kaalinta Aqalka Sare ee la xiriirta arrimaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya	8 September, 2024
Magacaabid Guddi ku meel gaar ah oo ka kooban labada Aqal una xiisaaran diyaarinta Xeerarka doorashooyinka, Ururrada iyo Xisbiyada JFS iyo Sharciga Dhismaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha.	7 November, 2024
Buuxin boos xubin ka geeriyyotay.	13 November, 2024



## WARBIXINNADA GUDDIYADDA AQALKA SARE

Guddiyada Aqalka Sare waa halbowlaha socodsiiinta howlaha Xeer dejinta Baarlamaannada, waan halka looga baaraan dago laguna turxaan bixiyo dhammaan howlaha uu qabto Baarlamaan.

Haddaba, shaxda hoose waxay soo koobaysaa waxqabadkii Guddiyada Aqalka Sare intii lagu gudo jiray kalfadhigii 5aad ee Baarlamaanka 11aad, iyagoo muujiyay howlkarnimo iyo wax qabad dhab ah:

1	G. Dastuurka	➤ Kulan	3	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	majiro	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	14	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	majiro	
2	G. Xeer-hoosadka	➤ Kulan	2	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	Majiro	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	majiro	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	
3	G. Garsoorka	➤ Kulan	6	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	W. Xajjka	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	Hal( Sharciga Naafada)	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	majiro	





4	<b>G. Arrimaha Gudaha</b>	➤ Kulan	21	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	2	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	Hay'addaha NIRA	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Hay'addaha NIRA Hay'addaha SODMA	
5	<b>G. Amniga</b>	➤ Kulan	majiro	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	Majirto	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	Majirto	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	
6	<b>G. Arrimaha Dibedda</b>	➤ Kulan	1	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	Majiro	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	majiro	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	
7	<b>G. Arrimaha Bulshada</b>	➤ Kulan	13	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	W. Cabashada Midawga Jaamacadaha Soomaaliyeed	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	Majirto	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	W. Warfaafinta Iyo Dalxiiska. iyo W. Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	





8	<b>G. Khayraadka</b>	➤ Kulan	9	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	Majirto	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	Majirto	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	W. Beeraha W. Degaanka W. Gaadidka	
09	<b>Guddiga Dhaqaalaha</b>	➤ Kulan	5 Gaara ah 12 Wadajir ah	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	W.Safarka Kenya W.Shillin Soomaaliga	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	8	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	
10	<b>G. Joogtada</b>	➤ Kulan	7	Kal.5aad
		➤ Warbaxinadda heer Guddi	Majirto	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	Majirto	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	



## WARBIXINNADA GUDDIYADDA KU MEEL-GAADHKA AH

Kalfadhigii 5aad ee Aqalka Sare, Goluhu wuxuu magacaabay laba Guddi ku meel gaadh ah, kuwaas oo loo xilsaaray howlo muhiim u ah dowlad dhiska Soomaaliya, waxaana shaxda hoose kusoo bandhigaynaa waxaabadiid oo kooban:

1	<b>G. B.S. Ciraaq</b>	➤ Kulan	1	Kal.5aad
		➤ Warbixinadda Guddi	Majiro	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	Majiro	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	
2	<b>G. KMG ah ee BFs ee ka shaqaynta Xeerarka Doorashooyinka</b>	➤ Kulan	9	Kal.5aad
		➤ Warbixinadda Guddi	Habraaca Fadhiyadda Guddiga	
		➤ Kulamo Dad-wayne Ama Shirar la-tashi	2	
		➤ Kulamadda horimaansho Marti	Majirto	



## METELAADDA BULSHADA SOOMAALIYEED

Aqalka Sare wuxuu si joogto ah uga jawaabaa dhibaatooyinka la soo gudboonaado Bulshada Soomaaliyeed, isla markaana wuxuu u ololeeyaa hormarinta adeegyada bulshada iyo adkaynta sarraynta sharciga.

Goluhu wuxuu xiriir wanaagsan la leeyahay ururrada Bulshada Rayidka ah ee ka dhisan Dalka.

### LA TASHIYADA DADWAYNAHA

Golaha oo ka duulaya mabda'a ka qayb qaadashada loo dhan yahay ee hannaanka samayn shuruucda dalka iyo ansaxintooda wuxuu doodo furan iyo kulamo ku saabsan ka talo galinta hindise sharchiyeedyada golaha la horkeeno u qabtaa dhamaan qaybaha kala duwan ee Bulshada si loogu biiriyar aragtiyadooda ku saabsan hindise sharchiyeedyada horyaalla Aqalka Sare .

- Sharciga ilaalinta xuquudan Naafada Qaranka
- Sharciga Xisbiyada & Ururada
- Ahmiyada Aqoonsiga Qaranka

### KAALINTA AQALKA SARE EE NABADDA IYO DIB U HESHIISIINTA

Aqalka Sare wuxuu mar walba taagan yahay nabadaynta iyo midnimada dadka Soomaaliyeed ee walaalaha ah wuxuuna marwalba abaabulaa shirara iyo kulamo wacyi galin ah oo nabadda iyo dib u heshiisiinta ku saabsan,

wuxuuna kal fadhiga 5aadqabtay kulan gaar ah oo ku saabsan kaalinta Odoyaasha Dhaqanka & Bulshada Rayidka ah ee Xalinta Colaadaha Sokeeye kaas oo la qabtay taariikhdu markay ahayd 11 Jannaayo 2025. Kulanka oo ay soo qaban qaabiyeen guddiga arrimaha gudaha aqalka sare kana soo qeyb galeen Xildhibaanno, Siyaasiyiin, xubno ka tirsan Odayaasha dhaqanka, Culumaa'udiin, Ururrada Bulshada Rayidka iyo masuuliyiin kale, ayaa la isku dhaafsaday Muhiimadda, xallinta khilaafaadka iyo kaalinta dowladda ee xal u helista colaadaha sokeeye ee ka taagan deegaanno badan oo dalka ka tirsan.

Kulankaas waxaa kasoo baxay war murtiyeed lagu soo jeediyay baaq nabadeed oo ku aadan joojinta colaadaha, sokeeye iyagoo sidoo kale ku booriyay in Golaha Aqalka Sare ay ku dabagalaan Xukuumadda Federaalka sidii loo xallin lahaa arrimaha khilaafaadka iyo colaadaha sokeeye iyo xal ka gaarista dagaalada u dhexeeya dadka walaalaha ah iyo khilaafaadyada kale ee ka jira dalka. si loo gaaro nabad iyo wada noolaasho





## XIRIIRKA ARRIMAHAA DIBADDA EE AQALKA SARE

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa uu metelaa shacabka Soomaaliyeed iyo ilaalinta danahooda wuxuuna ka mid yahay hey'adaha ugu

### SAFARO IYO WUFUUD

Lr.	Magaca	Wadanka	Guddiga/Xubnaha	TAARIKHDA
1	Sen. Xusen Maxamed Daahir	Turkiga	Guddiga Somalia iyo Turkiga	25/Nov/2024
2	1. Guddoomiye Cabdi Xaashi Cabdullaahi 2. Cabdinaasir Ibraahim Guuleed	Kenya	Guddonka	11/Nov/2024
3	1. Sen. Layla Nuur Maax 2. Sen. Xusen Maxamed Daahir	Uganda	Xubno	22/Oct/2024
4	1. Sen. Naciimo Xaaji Xasan 2. Sen. Samsam Daahir 3. Cabdullahi Xaaji Geedi Muumin	Switzeland	Xubno	12/Oct/2024
5	1. Guddoomiye Cabdi Xaashi Cabdullaahi	Imaaraadka Carabta.	Guddonka	22/Sep/2024
6	2. Sen. Abdixakiin Macalin Ahmed 3. Sen. Zamzam Abdullahi Ahmed			
7	Cabdinaasir Ibraahim Guuleed  1. Sen. Ayaan Aadan Cabdullaahi 2. Sen. Saciid Cabdi Xusee	South Africa  Armenia	Xoghayaha Guud  Xubno	17/Sep/2024  12/Sep/2024





## WUFUUDA SOO BOOQATAY AQALKA SARE

Lr.	Martida	Taariikh	Xafiiska
1	Wakiilka hay'adda UNICEF	0/6/2024	Xogahayaha
2	Guddoomiyaha Baarlamaanka Ururka Bulshada Bariga Afrika,	23/7/2024	Guddoonka
3	Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya	8/8/2024	Guddoonka
4	Danjiraha cusub ee Dowladda Shiinaha u qaabilsan Soomaaliya Mudane Wang Yu	22/8/2024	Guddoonka
5	Danjiraha Qatar u fadhiya Soomaaliya,		
6	Danjiraha Qatar u fadhiya Soomaaliya,	5/9/2024	Guddoonka
7	Danjiraha Midowga Yurub u fadhiya Soomaaliya	10/9/2024	Guddoonka
8	ku xigeenka wakiilka xoghayaha guud ee Qaramada midoobay Mudane Raisedon Zenega iyo Madaxa arrimaha siyaasadda ee UNSOM	17/09/2024	Guddoonka
9	Danjiraha Dowladda Shiinaha u qaabilsan Soomaaliya	19/9/2024	Guddoonka
10	wafdiga Dowladda Turkiga ka socday ee Dalka soo gaaray.	25/10/2024	Guddiga saaxiibtinimada Labada Aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya iyo Turkiga
10	shirka 18-aad ee Guddoomiyayaasha Baarlamaaannada Dowladaha Bulshada Bariga Afrika oo maanta ka furmay Magaalada Nayroobi ee Dalka Kenya.	13/11/2024	Guddoomiyaha Aqalka Sare iyo Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare





## METELAADDA DOWLADAH XUBNAHA KA AH DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Qod. 61aad (3) iyo 71aad ee Dastuurka KMG ah waxay qeexayaan in Aqalku metalo danaha Dowladaha Xubnaha ka ah dowladda federaalka Soomaaliya iyo ilaalinta nidaamka Federaalka ah ee dalku qaataay. Haddaba, si taas loo xaqiijiyo Goluhu wuxuu xiriir dhaw la leeyahay dhammaan Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaana u qabsoomay kalfadhiga 5aad arrimaha soo socda:-

Wakiilada Jubbaland warbixin guud oo ku saabsan howlaha Baarlamaanka Dowlad Goboleedka Jubbaland, xaaladda siyaasadeed iyo bulsho ee Dadwaynaha ku dhaqan deegannada Dowladda Jubaland, iyagoo sidoo kale ka wada hadlay xoojinta xirirka shaqo labada hay'adood ee Aqalka Sare iyo Golaha Wakiillada Jubaland iyo sidii looga wada shaqayn lahaa arrimaha hortebinta leh ee waajib gudashada Golayaasha Baarlamaanka heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed.

### ➤ KA TALO GALINTA HINDISE SHARCIYEEDYADA SOO GAADHO AQALKA SARE.

kal fadhiga 5aad Aqalka Sare wuxuu ka talo galay Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Qaranka, maadama uu Aqalku uu siyaadda Dowladda Federaalka ku matalo DXDF, isagoo taas ka duulayana wuxuu isagoo warqad casuumaad ah u diray dhammaan Dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka oo uu ka codsaday inay kusoo biiriyaan fikirkooda iyo talooyinkooda.

### ➤ SAFARRO SHAQO OO AQALKU KU TAGAY DOWLADDA JUBALAND

Guddiga Arrimah Gudah, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta Aqalka Sare wuxuu kalfadhigan safar shaqo ku tagay Magaalada Kismaayo si uu ugu kuur galo xaaladda siyaasasdeed, amni iyo bulsho ee ka jirta deegaannada dowladda Jubaland, wuxuuna kulamo mira dhal ah la yeeshay dhinacyada kala duwan ee bulshada iyo madaxda Dowladda Jubaland taariikhdu markay ahayd 2 October 2024.

### ➤ KULANKA GUDDOOMIYAH GOLAHA WAKIILADA JUBALAND

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka JFS, Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo xafiiska ku qaabilay Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad Goboleedka Jubbaland, Mudane Sheekh Cabdi Maxamed Cabdiraxmaan iyo xubno kale oo la socday 31 agoost 2024. Guddoomiye Cabdi Xaashi ayaa ka dhagaystay guddoomiyaha Golaha





## WARBIXINTA KALFADHIGA 5AAD XAFIISKA HABDHOWRAHA GOLAH AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA 11AAD:

Shaxda hoose waxay soo koobaysaa waxqabadkii Xafiska Hab-dhowraha Golaha Aqalka Sare intii lagu gudo jiray kalfadhiga 5aad ee Baarlamaanka 11aad.

Lr.	Wax Qabadka	Kalfadhiga 5aad
1	Furitanka Kalfadhiga Aqalka	0
2	Liiska Xaadirinta golaha	24
3	Liiska xaadirinta guddiga joogtada	6
4	Liiska xaadirinta labada gole	11
5	Codsiga Fasaxa Guddiyada	0
6	Codsi Fasaxa Senatarada	3
7	Warqada Fasaxa Senatarada	12
8	Warbixinta guddiga joogtada ah	0



## WAXQABADKA MAAMULKA AQALKA SARE

Maamulka Aqalka Sare oo uu hormuud u yahay Xoghayaha Guud, Ku-xigeenka Xoghayaha Guud iyo Agaasimayaasha Waaxyaha kala duwan ee Aqalka Sare waxaa muddadii uu socday kalfadhigii 5aad u qabsoomay hawlaha soo socda:

- Waxaa saxitaan, siiqayn iyo toosin lagu sameeyey shuruucdii soo gaaray Golaha oo ahaa Sideed hindise-sharchiyeed, sidoo kale, waxaa la diyaariyey talo-sharci oo laxiriirta kordhinta awoodaha Dastuuriga ah ee Aqalka Sare iyada oo laga faaiidaysanayo inta lagu gudo jiro wax-ka-badalka Dastuurka KMG.
- Waxaa Guddiga Xeer-hoosaadka gacan farsamo iyo talo sharci laga siiyey wax-ka-badalka Xeer-hoosaadka Aqalka Sare.
- Waxaa xusid mudan tahay in talooyin sharci la siiyey qaar kamid ah Senataradda Aqalka Sare.
- Waxaa la balaariyey Degelka (Website) Aqalka Sare iyada oo laga hawlgalay in hab casri ah loo kaydiyo xogta Aqalka Sare lagana hortago weerar dhanka Internet (Fire wall).
- Waxaa casriyayn iyo cilad bixin lagu sameeyey agabka (Electronic devices) iyada oo hawladeenada la siiyey tababaro aqoontooda sare loogu qaadayo.
- Waxaa si joogta ah loo baahiyaa loona kaydiyaa xogta Aqalka iyada oo lala wadaagayo dadwaynaha Soomaaliyed.
- Waxaa xogsiin joogta ah la siiyaa Guddoonka Aqalka Sare sidoo kale

waxaa Guddiyadda Aqalka Sare lagala taliyaa hawlaha la xiriira warbaahinta.

- Waxaa lagu guulaystay in la abuuro xiriir wanaagsan oo dhex mara Aqalka Sare iyo warbaahinta madaxa bannaan ee gudaha iyo tan caalamiga ah.
- Waxaa sare loo qaaday xiriirka Aqalka Sare la leeyahay Dowladaha Xubnaha ka ah Dowalada Federalka Soomaaliya, iyadoo la shaqeyn buuxda lala sameeyey Xafisiyada Xoghayeyaasha Guud ee Baarlamaanada DXDF iyo Agaasimeyaasha Guud ee Xafisiyada Madaxweyneyaasha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federalka.





- Golaha Aqalka sare wuxuu latashi Sharci la sameeyey Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federalka Soomaaliya iyada oo ay xusid mudan tahay in gacan laga siiyey qaar kamid ah Guddiyadda Aqalka Sare safarro shaqo ay ku tageen qaar kamid ah Dowlada Goboleedyada.
- Waxaa la agaasimay 85 kulan oo Guddiyada ah, kulanmadaas oo isugu jiray kulamo hor-imasha ah oo ay Guddiyada su`aalo ku waydiyyeen Madaxdii hortimid.
- Waxaa laga shaqeeeyey hab-maamuuska iyo Tas-hiilaadkii loo baahnaa si loo qabto 9 kulan oo ah dhagaysi dadweyne (Public hearing).
- Waxaa lagu guulaystay qabsoomidda 24 kulan oo Golaha Guud si gaar ah u yeeshay iyo 13 kulan oo ah kulamo wadajir ah.
- Guddiyadda Aqalka Sare waxaa laga caawiyeey diyaarinta 9 warbixin iyo diyaarinta Qorshe-hawleedka kalfadhigii 5aad.
- Senatarada Golaha waxaa gacan laga siiyey diyaarinta 15 codsi fasax iyada oo sidoo kale lagu guulaystay qaadista iyo kaydinta 37 xaadirin oo isugu jira kulamo gaar ah iyo kulamo wadajir ah.
- Waxaa si dhamaystiran loola shaqeeeyey Guddiga ku-meel gaarka ah ee ka shaqaynayey xeerarka doorashooyinka dalka iyo Guddiyadda saaxiibtinimada.
- Waxaa soodhawayn iyo sagootin loo sameeyey wufuud heer calaami ah iyo kuwo heer Dowladaha Xubnaha ka ah DFS oo booqasho ku yimid xarunta Golaha Aqalka sare sidoo kale waxaa sagootin iyo taban-taabin loo sameeyey Senataro ka qayb galayey shirar caalami ah.





## ORAAHDA XOGHAYAHA GUUD

Howl-wadeennada maamul ee Aqalka Sare waxay halbowle u yihiin habsami u socodka howlaha kala geddisan ee Golahani loo igmaday, waxayna gacan farsamo oo hagar l'aan ah siiyaan Guddoonka, Guddiga Joogtada ah, Guddiyada kala duwan ee Aqalka Sare iyo Senatorrada Aqalka Sare ee Baarlamanka Federaalka Soomaaliya.

Howl-wadeennada Aqalka Sare waxay ku maqaam iyo xuquuq yihiin shaqaalaha raiyadka ah ee Dowladda ee lamaha kala duwan ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu leeyahay lix waaxood, howlwadeenno u gaar ah iyo la taliyayaal sharci, kuwaas oo heegan joogto ah ugu jiro gudashada howlaha Aqalka Sare iyagoo si hagar la'aan ooy dadaal iyo karti ku jirto gacan buuxda ka siiya Golahani si uu si hufan ugu guto waajibaadkiisa dastuuriga ah, isla markaana u dhabar adeegay inay ka soo dhalaalaan waajibaadkooda shaqo.

Kalfadhga 5aad ee Baarlamaanka 11aad wuxuu ahaa kalfadhigii ugu shaqada badnaa Aqalka Sare ee Baarlamanka Federaalka Soomaaliya marka loo firiyi afartii kalfadhi ee ka horreysay. Maamulka Sare iyo howl-wadeennada Aqalka Sare oo uu hormuudka u yahay Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare iyo ku xigeenkiisa waxay ku guulaysteen iyagoo marwalba ka shidaal qaadanaya tilmaamaha ama hagista Guddoomiyaha Aqalka Aqalka Sare iyo Labada Guddoomiye Ku xigeen inay qabtaan ayna fududeeyaan dhammaan howlaha farsamo ee Aqalku u baahan yahay, iyagoo si dhow ula shaqeeeyay Guddoonka Aqalka, Golaha guud iyo guddiyada Aqalka Sare iyo kuwa ku-meel-gaadhka ah ee howlaha gaarka ah Goluhu igmaday.

Maamulka Sare ee Aqalku wuxuu bogaadinayaan howl-wadeennad Golaha ooy hormuud u yihiin Agaasimayaasha waaxyaha Golaha sida howl-karnimada, daadaalka iyo hufnaanta leh ee ay u guteen howlihii loo igmaday, waxaana u rajaynaa guul iyo horumar joogto ah sanadaha soo socda.



”

*Xoghyaha Guud ee Aqalka Sare BJF  
Cabdiniasir Ibaarhim Guuleed*





waxaa soo diyaariyay xafiska  
xoghayaha guud ee Aqalka sare BJS

📞 +252611234030

✉ sg@senate.gov.so

🌐 @senatesom

tiktok @senatesom

twitter @aqalkaSare